



Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation
Office of the Minister

Tix: WAGF&D/XW/0106/19

Taariikh: 11/12/2019

HESHIIS LAGA GAAREY ARRIMAHGA GALMUDUG

Ugu horrayn, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-Heshiisiinta waxay fursaddan uga faai'daysanaysaa in ay hoggaanka dhaqanka iyo shacabka reer Galmudug uga mahad celiso dulqaadki ay ku wajaheen iyo dowladi wax ku oolka ahaa ee ay ka qaateen si xal waara looga gaaro dib u dhiska Galmudug.

Waxaa si aan kala go' lahayn u socdey wada hadallo ka dhexeeya Dowladda Federaalka iyo ASWJ oo ay gacan siinayeen shakhsiyaad iyo mas'uuliyiin isugu jira dhaqan, siyaasiyiin iyo ganacsato ka soo jeedda degaanka Galmudug si loo gaaro xal waara loona helo Galmudug midaysan.

Waxaa lagu heshiyeey in ASWJ Golaha Wakiillada Galmudug laga siiyo 20 (labaatan) xildhibaan. Qoondada xildhibaanadaasi waxay ka imaanayaan 89ka xubnood ee Golaha Wakiillada Galmudug waxayna ku egtahay dhammaadka muddo Xileedka Golaha Wakiillada GM ee hadda dhismaya.

Dowladda Federaalku waxay uga mahad celinaysaa ASWJ dadaalki iyo tanaasulaadki ay muujiyeen si loo dhiso Galmudug midaysan, xasilloon shacabkeedana u horseedda amni, caddaalad iyo horumar. Sidoo kale waxaan u mahad celinaynaa beesha caalamka oo gacan ka gaysatay in ay wada hadalladu mira dhal ku dhammaadaan.

Cabdi Maxamed Sabriye
Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-
heshiisiinta
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cabdi
(11/12/2019)